

# Somali

Ayadoo la tixraacayo sharciga xuquuqda aadamaha ee Dowlada Dhexe iyo Wasaarada Beeraha ee U.S (USDA), xeerka dhaqan galinta xuquuqda aadamaha, USDA, wakiiladeeda, xafiisyadeeda, shaqaalaheeda iyo waaxaha ka qeybqaadanaya ama ka shaqeynaya ee maamulaya mashaariicda ay bixiso USDA waa ka madnuuc iney sameeyaan takoor ku saleysan jinsiyada, midabka, wadanka uu markiisii hore ka yimidey qofku, lab/dhedig, laxaad daro, da'diisa, ama aargudasho, ama xiriir la leh dhaqdhaqaaqyada xuquuqda aadamaha u dooda, mashruuc kasta oo ay bixiso ama kharash siiso USDA in lagu takooro waxyaabaha kor ku xusan waa madnuuc.

Shaqsiyaadka qaba laxaad daro ee u baahan qaab kale oo loola soo xiriiro si ay u helaan warbixinta mashruuca (tusaale, Farta ay akhriyi karaan dadka indhaha waxba ka arki karin, Far waaweyn oo lowgu daabaco, cajalad la dhageysto, luqada lagula hadlo dadka dhagoolayaasha ee loo yaqaano American Sign Language, iwm), waa iney la soo xiriiraan wakiilka (Gobolka ama Degaanka) oo ah halkii ay ka codsadeen faa'iidooyinka ay helaan. Shaqsiyaadka aan dhagaha wax ka maqli karin, dhib ka qaba maqalka, ama aan hadli karin waxay la soo xiriiri karaan USDA kalana xiriir Gudbinta Adeegyada Dowlada Dhexe ee (800) 877-8339. Waxaa raaca, in warbixinta mashruuca lagu heli karo luqado kale oo ka duwan ta ingiriisiga.

Hadaad rabtid inaad xereyso cabasho ku saabsan takoor, buuxi oo dhameystir Foomka Cabashada Takoorka ee USDA, (USDA Program Discrimination Form) (AD-3027) taasi oo laga helo shabakada [http://www.ascr.usda.gov/complaint\\_filing\\_cust.html](http://www.ascr.usda.gov/complaint_filing_cust.html) waxa kale oo foomkani laga helaa xafiis kasta oo ay leedahay USDA, ama u soo qor warqad ku socota USDA warqadana waxad soo raacisaa dhamaanba warbixinta lagu codsadey foomka. Hadii aad rabtid inaad codsatid koobi ah foomka cabashada, soo wac (866) 632-9992. U soo dir foomka cabashada ama warqada USDA:

- (1) Boostada: U.S. Department of Agriculture  
Office of assistant Secretary of Civil Rights 1400 Independence Avenue, SW, Washington, D.C. 20250-9410;
- (2) Fax: (202) 690-7442; ama
- (3) Email: [program.intake@usda.gov](mailto:program.intake@usda.gov).

WAA HAY'AD BIXISA FURSAD LOO WADA SIMAN YAHAY.

WICNS / DHSS (08-2016)